UNITED NATIONS NATIONS UNIES

# XAFIISKA QARAMMADDA MIDDOBAY U QAABILSAN KAALMEYNT SOOMAALIA (UNSOM)

**Khudbadii uu Ergaygga-Gaarka ah ee Xog-hayaha-Guud ee Qaramadda Middobay uu ka jeediyay Shirka looga hadlayo Arragtidda ku saabsan "Sanadda 2016"**
**Muqdisho, 2 Sebtember 2013**

**Mudane Madaxwayne, Xasan Sheikh Maxamud,**

**Mudane, Raiisul-wasaare kuxigeenka isla markaasna ah Wasiirka Arrimaha Dibedda,**

**Mudanayaasha Baarlamaanka,**

**Mudanayaasha iyo Ergadda Diblomaasiyiinta ahba,**

**Wasiiradda, Wasiiru Dowliyaasha, iyo Wasiraddii horebe,**

**Duqa Magaaladda Muqdishu,**

**Saaxiibayaal, Mudanayaal iyo Marwooyinba,**

Waxaan ku faraxsanaha in la igu martiqaado, kana hadlo furitaanka shirkan muhiimadda leh. Maadaama aan ahay nin marti ku ah ah waddankiina, kulankan wuxuu isiinayaa fursaddii aan idiinkugu mahad celinlahaa dhamaantiina taas oo ka turjumaysa siddi anniga iyo Qarammadda Midoobayba na loogu soo dhoweeyay wadanka. Waxaan aaminsanahay, in waxyaabaha laga doonayo qofka martidda wannagsan ah in ay ka yihiin, in uu waxa dhegeesto si uu wax ubarto. Waxaana isku dayay seddexdii bilood ee la soo dhaafay in aan waxbarto, hadana maanta waxaan isku dayayaa in aan sidii oo kale yeelo. Bulshadda caalamka oo wada- dhan, ayaa Xafiiska UNSOM siisay wajibaad (adag, cad) lana xirrirta shaqada. Waajibaadkas oo aad oogu haboon shirkan maanta dhacaya. (Si daas darted, Labo waajibaad oo muhiim ah ayuu Golaha Amaanka si gaar ah oogu xilsaaray (UNSOM) sida ku cad Qaraarka tirsiggisu yahay 2102:

**Marka koowaad** in la adegsaddo "Xafiisyadda-dhexdhexaadka ah"- good offices" ee Qaramadda Middoobay si loo taageero dadaaladda ay waddo Dowladda Federaalka Soomaaliyeed ee ku aadan Nabad Samaynta iyo Dib-uheshiisiinta.

**Marka xigta** in lataageero Dowladda Federaalka iyadda oo la siinayo talo istratejiyeed ee laxiriirta sidii loo horumarin lahaa Nidaamka Federaalka, dib-ueegis loogu sameeynlahaa Dastuurka, kadibna cod loogu qaadi lahaa iyo sidii loogu diyaargaroowi lahaa doorashooyin Sannadka 2016.

Waxaan aad u jeclaystay shirkan ay abaabushay Dowladda Federaalka Soomaaliyeed iyo mudada gaaban ee ay ku abaabushay.

Dhab-ahahaantii Qaramadda Middobay waxay taageeraysaa geedi socod siyaasadeed ee ka dhacaya gudaha Soomaaliya, dibna loogu eegayo, laguna dhamaystirayo howlaha Dastuurka, looguna diyaar- garoobayo sidii loo qaban lahaa doorashooyin madax banaa oo xor ah sannaddka 2016. Waxaa ii muuqata in howlaha shirkan ay ku socdaan wadda adag oo muhiim ah. Waana wadadii loo mari lahaa Demoqaraadiyadda dhabta ah.

Qaramadda Midoobay waxay taageeraysaa u jeedooyinka shirkan kuwaas oo ay ka midyihiin sidii loola iman lahaa aragti, iyo talooyin la taaban karo oo xambaarsan rajo, loogun diyaarin lahaa Soomaaliya so dii ay ugaari laheed u jeedooyinka Demoqaraadiyadeed ee ay higsanayo in ay gaarto Sannadda 2016.

Madaama aan weli ku jiro maalmihii oogu horeeyay ee howgalkayga, waxaa doonayaa in aan idiinla socodsiiyo seddexda arrimood oo ay ku qotonto, ama hagaysa Howshaydda.

**Mabda'a koowaad**: **waa aragti kuqotonta in dadka Soomaaliyeed ay ka tashadaan arrimahooda, garwadeena ka noqdaan.** Si daas darteeda, muddo hadda laga joogo hal sanno ayey arrimaha Soomaaliyeed is bedeleen, mudadaasna waxaa la doortay Baarlaman loo wadda dhanyahay oo Sharci ah, Guddomiye, iyo Maddaxwayne. Arrimuhuna waxay is beddeleen sannadkii hore wakhtigaan oo kale. Hadda oo ay sannad ka soo-wareegatay wakhtiga aan sheegayno, waxaa la diyaariyay Qorhse lagu magacaabo- "New Deal Pact", Qorshahaas oo la

gayndoono Shirwayne ka dhacaya Brusseles: Qorshaana waxaa iska leh dadka Soomaaliyeed, wuxuuna xambaarsanyahay ujeedooyin ka turjumaya siddi loo nabadeeynta lahaa Soomaaliya iyo siddi loo dhisi lahaa Dalka.

**Mabda'aygga labaad wuxuu yahay: wax-kaqabashada arrimaha (dhibka) dalkiina keligiin kuma tihiin, waana in aadan ku ahaanin keligiin.** Ilaa iyo 1991kii, markii arrimaha dalkla ay burbureen, jawaabaha bulshada caalamka ay ka bixinayeen arrimaha Dalka waxay ahaayeen mid aan kala caddeyn, taariikh ahaana isku qasan. Anagu si xoogle (waa hadaan nahay bushadda caalamka) ayaan wax isugu daynay in aan u qabano(muddada aan soo sheegay), laakiin jawaabta aan helnay waxay aheed mid aan caddayn. Mar- mar waxaan u muuqanay kuwo iska tagirabay, ama iska socdaali lahaa. Laakiin arrimaha ma'aheen sidaas oo kale labadii sanno ee la soo dhaafay. Shirarkii lagu qabtay magaalooyinka, London, Istanbul, New York, Rome iyo Japan ayaa aad u muujinayo sida ay bushada caalamka oo midaysan ooga go'antahay in ay barbar istaagaan Soomaalidda. Joogitaanka AMISOM iyo nafta ay ku bixinayaan dalka ayaa ka markhaati kacaya go'aanka aan sheegayo- naf iyo maaliyad xoogle ayaa la hurayaa. Annaga oo wada-jirna, waxaan wax ka qabanay burcadd baddeda iyo macluushii dalka ka jirtay.

Qarramadda Middobay kaalmo wayn ayey geeysatay siyaasiyan- waxaana hambalyo iyo boogaadinba isugu darayaa dadaalkii iyo dowrkii waynaa ee uu ciyaaray Ergayggii iga horeeyay- Danjire Mahiiga. Qaramadda Middobay waxa kale oo ay la daalaa-dhacaysay arrrimaha baniaadinimadda iyo horumarinta. Maanta, 760,000 oo caruur Soomaaliyeed ah ayaa dhigta iskuulo gacan ka helaya UNICEF:(badh ka mid ah caruurtan waa gabdho). Sidookalena, 1.4 million oo dad ah ayey mucaawano gaarsiisay Hayadda WFP sanaddan horaanteeda oo keliya. Siddo kale, dad gaarayo 4 Million ayaa laga talaalay cudurka Booliyadda in kastoo laga yaabo in carur gaaraysa ilaa 600, 000 aan weli la talaalin, kuwaas oo intooda badani ay ku noolyihiin dhulka shabaabka xukumo. Sidaas darteeda, fariintayda waxa ay tahay, UNSOM way idinla jirtaa wayna-idiinla joogi doontaa si aan horay loo arag. UNSOM waxay hadda joogtaa Muqdishu, Garoowe, Hargaysa, mudda dhowna waxay tegi doontaa oo ay xafiis kafuranaysaa Baydhabo, Beletweyne iyo Kismayo. UNSOM waxay degantahay Soomaaliya. Annigu guri iiguma yaalo Nayroobi. Keligiina matihiin, waxaan halkan u joognaa in aan wax kaalmayno, waana joogaynaa inta loo baahanyahay kaalmadaanada.

**Mabda'a Seddexaad ee I hagaya waxa uu yahay: in** ay dhibaato siyaasadeed na hortaagantahay una baahantahay xal siyaasadeed. Haa, waa run, waxaa idin haysato dhibaato badan sida horumarlaaan, dhaqaale, Amaan Xumo, iyo dhibaato ku-saabsan maamul iyo xuquuqul insaan, laakin dhamaan arrimahan waxaa ka wayn in la helo "Xal-siyaasadeed". Aniggu waxay iila muuqataa in ay aad u sahlantahy sheegidda dhibaatada ubucdeeda, haba is ka adkaato xal u helideeda. Labbaatan iyo labo Sanno oo dhibaato ah ka dib, waxaa kala qay-bsame, awoodi dowladda, kontroolkii dhaqaalaha iyo dhowristii xuquuqul insaanka. Waxaa meesha kabaxday Dowladdi dhexe ee uu xukunka gacanteeda ku uruursanaa. Gobolo iyo dadyaw kala gedisan ayaa hadda mid-walba meeshiisa uu ku haysta qaybyar oo kamid ah Awoodi. Si daas darted weeye sida aad u qaadateen habka Federaalka oo ah midka keliya ee maanta dalka ka shaqaynkara ama waafaqsan xaqiiqda jirta.

Howsha hadda taala waxa ay tahay siddi aad oogu heshiin laheedeen siddi uu nidaamka Federaalka oogu shaqaynlahaa dhexdiina, siddi aad ku waddagi laheedeen Awoodda, dhaqaalaha, dakhliga, khayraadka waddanka, iyo masuuliyadda- taas oo la waafajinayo hab dadka Soomaaliyeed oo dhan ay uga wadda faaiidaysan karaan ayaga oo wada dhan. Arrimaahan waa kuwo addag, laakiin waa kuwo u baahan in xal loo helo mar un.

Dadka Soomaaliyeed waxay leeyihiin awood weyn iyo go'ano adag oo ay ku dhaqaajin karaan Dawladda iyo bulshada caalamkaba, waana geesiyaal sida dhalinyaradda haweenka ah ee dibadda ka soo noqoneysa si ay u gutaan kaalin-tooda ku aadan.

**Oogu dambayntii, sababahan soo socda dartood ayaan rajo wanaagsan u qabaa**. Muddadii yareed ee aan bartay Soomaalidda, waxaan la yaabay sida ay u yihiin dad jecel in ay wadda hadlaan oo ay u doodaan, waxay leeyihiin dhamman awooddihii iyo xirfadihii lagu xalin lahaa dhibaatooyinka siyaasadeed ee aad ka uadag. Soomaalidu:

UNITED NATIONS NATIONS UNIES

# XAFIISKA QARAMMADDA MIDDOBAY U QAABILSAN KAALMEYNT SOOMAALIA (UNSOM)

**Waxay jecelyihiin in ay wadda hadlaan oo ay doodaan**, waxayna jecelyihiin in ay dhibkooda ku cabiraan gabayadda, hadalka iyo Siyaasadaba.

**Waana dad jecel in ay helaan cadaalad, wayna ka go'antahay helitaanka arrintaas.**

Ugu dambaystii, waxa Idhiirigeliyey degdegsiimada hadda la doonaayo in wax lagu qabto. Waxa buur lafuulayo oo kale ah in Dastuurka dib u eegis lagu suubiyo, loona codeyo, kadibna doorasho loo qabto sannada 2016 gudaheeda. Hadda waxaan ka soo gudubnay hal sanno oo hawl-galida ay xoogaa gaabis aheed. laakiinse hadda, waxaan dareemaya in talaabada la dedejinaayo- baarlamaankii ayaa si hagar la'aan ah u hawl galay bishii Soon oo idil. Waxaa la qoray sharuucdii qaar ka mid ah, waxaana la dhisay gudiyadii, welina waxaa dhimman in badan. Ugu dambeyntiina arrimihii Jubbooyinka ayaa wax laga qabtay. Waxaan si diiran u soo dhaweynaya qarabyadii heshiiska ku gaaray AddIs Ababa usbuucii hore. Waxaa hadda gebagebo ku dhaw diyaar gareyntii Qorshihii 'New Dealka'. Waxaanna wada tashiyo laga soo sameeyey magaalooyink Baidoa, Garowe, iyo Muqdishu, welina waxaa loo baahan yahay in wadatashiyo hor leh la sameeyo

Maantana, waxaa bilowday Shirkan. Waxaan rajaynayaa in ay shirar kale kadambeyn doonaa shirkan. Waxaa laga yaabaa in markaad shan- maalmood wadda doodaan, aad go'aansataan in aad shir gaar ah u codsataan shanta mowduuc ee aad ka hadli doontan. Haddi aad sidaas doorataana, Qaramadda Midoobay way idin taageeri doontaa, waxaana laga yaabaa in aad shirarkiina ku qabsataan marba magaalo wayn oo ka mid ah dalka. Wadahaladda hadda socda waa in ayna ku dhamaanin halkan, Codka haweenkuna waa in si gaar ah loo maqlaa.

Manta waa maalin taariikhi ah marka la eego geedi socodka siyaasadda, laakin ogaada hadda waxaa un laqaaday talaabo kamid ah tallabooyinkii laqaadi lahaa wakhtigga geedi socodka kuaadan sanadda 2016. Waxaana rajaynayaa in aan ka midahaado dadka iddinkula safrayo wadadda aad maraysaan. Qaramadda Midoobay waxay diyaar utahay in ay dhinacyo badan ka taageerto Dowladda Federaalka ilaa ay ugu gudbayso nidaam ku dhisan Demoqaraadiyadda. Waxaan si gaar ah u eegaynaa siddi aan ooga taageeri lahayn Dowladda Arrimaaha muhiimadda uleh- kuwas oo soo kordhaayo markasta oo ay wadahadaladda iyo is-afgarad heer-qaran-ahba lagaaro. Sikasta oo ay arrinta tahay, anaga waxaba kama reebanayno Dowladda Federaalka iyo Hayadaheeda is loo gaaro u jeedooyinka waawayn ee Shirkan.

Waxaan idiinkaga mahad celinayaa dhegaysigiina wanaagsan. Waxaan u hambalyaynayaa Madaxwaynaha kaas oo abaabulay shirkan. Dhamaantiinana waxaan idiin rajaynayaa in aad guul ka keentaan shiraka, aniga oo rajaynayo in aad u howlgeli doontaan si ku qotanta isu tanaasul, is afgard, iyo dhamaantiina oo is wadaxurmeeyaba.

Waad Mahadsantihiin.